JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |



## XEERKA XAKAMAYNTA HUBKA FUDUD
## XEER LR.32/2010


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2022*

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/DM/249/2-182/092010 DATE 13/09/2010

# Degreeto Madaxweyne No: 0070/092010

## Dhaqan-galka Xeer Lr.32/2010 ee Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu arkay:** Ogolaanshaha Golaha Wakiiladda ee Xeer Lr. 32/2010,

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka JSL,

**Markuu helay:** Go'aanka Golaha Wakiiladda JSL ee ku suntan GW/KF-12/494/2010 ee Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud,

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka JSL.

**Wuxuu soo saaray**

Dhaqan-galka xeer Lr. 32/2010 ee Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud oo lagu baahin doono Faafinta rasmiga ah (Bulatino Officiale).

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Ref: GW/KF-12/494/2010

Date : 09/08/10

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud (Xeer (No.39/2010)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka **38aad, faqradda 4aad xarafyada B&T &** Qodobada **39aad, 110aad,111aad, iyo 112aad** ee Dastuurka iyo Qodobka 3 aad faqradiisa 11aad ee Xeer Hoosaadka Golaha wakiiladda Jamhuuriyada Somaliland.

**MARKUU DERSAY:** Sharciga lambarkiisu yahay **70/95** ee **27/11/95** iyo Warqada dhaqangelintiisa ee **Lr. JSL/M/WA/222-038/1299** ee **17/12/1999** ee Madaxweynaha JSL Xakamaynta hubka iyo rasaasta dagaalka.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Xeerka nabadgalyada Guud ee Xeer **Lr.14/1963** Public order law.

**MARKUU OGAADAY:** Marxaladda lagu jiro,iyadoo dad shicib ahi ay hub iska sitaan suuqyadda magaalooynka dhexdoooda si fududna wax isku yeeli karaan.

**MARKUU U CODEEYEY:** Xeerka Xakamaynta Hubka fudud,**Kal-fadhigii 12aad fadhigiisii 10 aad ee 09/08/2010** oo ay goob joog ahaayeen **(47)** Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha **Golaha Wakiilada.**

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(45 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud ee (Xeer **No. 39/2010**), halka **hal (1) mudane** ka diiday, cid aamustayna aanay jirin,**Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**C/raxmaan Maxamed C/laahi(Ciro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

Bismilaahi Raxmaani Raxiim

## Golaha Wakiiladu

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 110aad, 111aad iyo 112aad ee Dastuurka JSL |
| Markuu Arkay: | Xeerka Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka (Lr.23/2002) |
| Markuu Arkay: | Sharciga lambarkiisu yahay 70/95 ee 27/11/95 iyo warqada dhaqangalintiisa ee Lr. JSL/M/WA/222-038/1299 ee 17/12/1999 ee Madaxweynaha JSL Xakamaynta hubka iyo rasaasta dagaalka |
| Markuu Arkay: | Xeerka Nabadgelyada Guud ee Xeer Lr. 14 ee sanadkii 1963 (Public Order Law) |
| Markuu ogaaday: | Marxallada lagu jiro iyadoo dad shicib ahi ay hub iska sitan suuqyada magaalooynka dhexdooda si fududna wax isku yeeli karaan |

WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN

## Qodobka 1aad

## Macnaha Erey Bixinta

| | |
|---|---|
| Hubka fudud: | waxaa loola jeedaa Hubka Fudud sida qoriga AK, Baastoolada iyo noocyada la midka ah. |
| Ruqsad: | waxaa loola jeedaa oggolaanshaha qoriga ama baastoolada la diiwaangeliyey. |
| Wasaarad: | waxaa loola jeedaa Wasaaraka Wasaaradda Arrimaha Gudaha |
| Wasiir: | Waxa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha |
| Xafiis: | waxaa loola jeedaa Xafiiska Diiwaangelinta Hubka Fudud ee Gobolka |
| Diiwaangelin: | waxaa loola jeedaa Xafiiska Diiwaangelinta Hubka Fudud |
| Difaac: | waxaa loola jeedaaa difaaca qofka naftiisa iyo hantidiisa si xeerka waafaqsan |
| Hub Hanti Dawlo: | waxaa loola jeedaa Hubka waa-weyn eek u cad sharci Lr 70/95 oo ah Xeerka Xakamaynta Hubka iyo Rasaasta Dagaalka. |
| Walxaha qarxa: | waxaa loola jeedaa Bamamka, Miinooyinka Gumacyada, iwm.., ee qarxa |
| Ajinebi: | waxaa loola jeedaa qofka aan u dhalan Somaliland ee haysta waraaqda degenaanshaha Rasmiga ah ama magan-gelyo siyaasadeed |

## Qodobka 2aad

## Ujeeddooyinka Xeerka

Iyadoo lagu xakamaynayo, maamulayo, laguna diiwaangelinayo Hubka fudud Ujeeddooyinka Xeerkan laga leeyahay waxaa ka mid ah in:

1. La xoojiyo xaqa dastuuriga ah ee qofku u leeyahay inuu nabad u helo naftiisa iyo maalkiisa.
2. Laga hortago haysashada iyo lahaanshaha sharci darrada ah ee Hubka Fudud.
3. Ay dawladdu awood u yeelato inay bulshada ka qaaddo ama ka xerayso hubka sharci darrada ah.
4. Laga hortago ama la yareeyo dambiyada lagu galo Hubka Fudud.
5. La abuuro hab muuqda oo shaqaynaya oo lagu ilaaliyo Hubka Fudud.

## Qodobka 3aad

## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa Xeerka Xakamaynta Hubka Fudud.

## Qodobka 4aad

## Fasiraadda Xeerka

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka, Shareecada Islaamka iyo Xeerarka kale ee Dalka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

## Qodobka 5aad

### Xadka Addeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagaga dhaqmayaa dhammaan xuduudaha Jamhuuriyadda Somaliland

## CUTUBKA LABAAD

## DIIWAAN-GELINTA IYO RUQSAD SIINTA HUBKA FUDUD

## Qodobka 6aad

### Diiwaangelinta Hubka Fudud

1. Dhammaan Hubka Fudud ee qofka keliyi qaadan karo laguna talogalay difaaca naftiisa iyo hantidiisa sida qoriga "AK", Baastoolada iwm, iyo rassatooda, waa in la diiwaangeliyaa.

## Qodobka 7aad

### Cidda U Igman Ruqsad Bixinta Iyo Diiwaan-gelinta

1. Diiwaan-gelinta hubka fudud ee uu jideeyay Xeerkani waxa u xilsaaran Wasaaradda Arrimaha Gudaha sida cad sharciga xakamaynta hubka iyo rasaasta dagaalka ee Xeer Lr. 70/1995.
2. Qaabka, midabka, qoraalka lagu muujiyo ruqsadda, ogolaanshaha daabacaadda, cidda u igman saxeexa dhukmentiga iyo wixi la xidhiidha, waxa Xeer-Nidaamiye aan xeerkan ka hor imanayn ku soo saaraya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
3. Muwaadin kasta oo loo diiwaan-geliyo hubkiisa fudud waa inay Wasaaraddu siisaa warqadda ruqsadda oo leh lambr tirsi ah.
4. Waxa Xafiiska diiwaan-gelinta hubka fudud iyo ruqsad bixinta loo magacaabaya mas'uul sare oo ku sifoobay daacadnimo iyo hawlkar, kaasi oo leh saxeexa ruqsadda, isaga oo hubinaya foomka muwaadiniintu soo codsatay in uu waafaqsan yahay xeerkan.

## Qodobka 8aad

### Ogolaanshaha Diiwaan-gelinta Hubka Fudud Ee Muwaadinka

1. Muwaadin kasta oo u dhashay Somaliland wuxuu xaq u leeyahay inuu haysto Hubka Fudud ee difaaca naftiisa iyo hantidiisa si xeerka waafaqsan, haddii uu u baahdo.
2. Qof kasta oo u haysta Hubka Fudud sifada ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waa inuu ka diiwaan geliyo Xafiiska diiwaan-gelinta Hubka Fudud ee Gobolka uu degan yahay.
3. Ogolaanshuhu waa in uu ku salaysnaadaa asbaab mucayin ah sida hanti iyo nafba.

## Qodobka 9aad

### Ogolaanshaha Diiwaan-gelinta Hubka Fudud ee Ajnabiga

1. Qof kasta oo ajnabi ah oo haysta sharciga deganaanshaha Rasmiga ah ee Somaliland ama dalka ku jooga magangelyo siyaasadeed waa loo ogol yahay inuu haysto Hubka Fudud ee difaaca naftiisa iyo hantidiisa, si xeerka waafaqsan
2. Qof kasta oo ajenabi ah oo Hubka Fudud u haysta sifada ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan, wuxuu xaq u leeyahay in loo diiwaangeliyo lana siiyo ruqsada.



XAFIISKA GARYAQAANKA · FAAFINTA RASMIGA · OFFICIAL GAZETTE

## Qodobka 10aad

## Muddada Dhammaadka Ruqsadda

1. Muddada ogolaanshaha ruqsadda Hubka Fududi waa hal (1) sanno oo ka bilaabanta maalinta la bixiyey ruqsadda.

2. Qof kasta oo haysta ruqsadda Hubka Fudud waa inuu cusboonaysiiyaa ruqsaddiisa marka ay dhamaato halka sanno.

3. Qof kasta oo raba in loo cusboonaysiiyo ruqsaddiisa haysashada Hubka Fudud waa inuu u soo qortaa arjiga cusboonaysiinta ruqsadda hubka Xafiiska diiwaan-gelinta Hubka Fudud ee gobolka uu deggan yahay 30 casho ka hor dhamaadka taariikhda ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan.

4. Haddii arjiga cusboonaysiinta ruqsaddu dib uga dhacdo muddada ku xusan farqadda 3aad ee qodobkan, waa inuu codsaduhu dib u soo qortaa arji cusboonaysiinta, wasaaradduna u soo ogolaataa cusboonaysiinta ruqsadda.

5. Qofkasta oo haysa ruqsada Hubka Fudud waxa waajib ku ah inuu bixiyo cashuur sannadeed dhan 30,000 Sl, Shilin/=

## Qodobka 11aad

## Muddada Diiwaan-gelinta La Oggolyahay

1. Muwaadinka kasta oo deggan Somaliland ama qof kasta oo ajanabi ah oo haysta sharciga daganaashaha Rasmiga ah ee Somaliland ama magan-gelyo siyaasadeed la siiyey ee haysta Hubka Fudud, waxa waajib ah inuu ka qaato W/Arrimaha Gudaha ogolaanshaha (ruqsadda) haysashada Hubka Fudud, iskana diiwaan-geliyo xarunta diiwaan-gelinta hubka ee gobolka/degmada uu deggan yahay muddo 12 bilood gudahood ah laga bilaabo maanta xeerkani dhaqangalo.

2. Qof kasta oo haysta Hubka Fudud ee difaaca naftiisa iyo maalkiisa ee ku diiwan-gelin waaya muddada ku xusan farqadda 1aad ee Qodobkan ah waxaa laga qaadayaa tallaabo sharci oo waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud.

## Qodobka 12aad

## Nooca Ruqsadda iyo Qoraalkeeda

1. Ruqsaddu waa Buug yar oo aan si fudud loo beddeli Karin, kuna sawiran yahay nooca hubka lagu ogolaaday oo tirsi taxana ah leh.

2. Magaciisa oo afran iyo magaca hooyaddii

3. Meesha uu ku dhashay deganyahayna

4. Waxa lagu dhejiya sawirka mulkiilaha ogolaanshaha la siiyay

5. Lambarka Hubka fudud ee la ogolaaday noociisa (Qori/Baastoolad)

## Qodobka 13aad

## Diiwaanka Hubka Fudud

1. Diiwaanka Hubka Fudud ee Xafiiska diiwaangelinta gobolka waa in la dhigaa goobta lagu kaydiyo dokumentiyada qarsoodiga ah ee xarunta gobolka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

2. Hubka Fudud ee la diiwaangeliyey waa in saddexdii (3) biloodba mar loo gudbiyo taliska Ciidanka Booliska gobolada.

3. Hubka Fudud ee kasta ee Xafiiska Wasaaraddu diiwaangeliyo waa in lagu muujiyaa: -

   a. Magaca mulkiilaha hubka (qoriga/bistooladda) oo saddexan.

   b. Lambarka (S/No.) hubka (qoriga/bastooladda).

   c. Lambarka Ruqsadda (ogolaanshaha).

   d. Lambarka warqadda cashuurta lagu bixiyey.

   e. Maalinta Ruqsadda labixiyey.

   f. Taariikhda ruqsaddu dhacayso.

## Qodobka 14aad

## Meelaha ka reeban in lala gallo.

Waxa reeban in lalagalo hubka fudud ee ruqsada leh goobaha ay ka midka yihiin: -

a. Qasriga Madaxtooyadda

b. Xarunta Baarlamaanka

c. Maxkamddaha dalka JSL

d. Goobahaleh xasaanad dibloomaasiyadeed

e. Xeryaha ciidmadda

f. Hay'adaha caalamiga ah

g. Goobaha caafimaadka

h. Goobaha waxbarashadda

i. Iyo Goobaha Cibaadada

## Qodobka 15aad

## Cidda Ka reebban Ruqsadda Hubka Fudud

1. Waxaa reebban in la siiyo ogolaanshaha (ruqsada) qaadashada Hubka Fudud haddii qofku ku sifoobo ama uu yahay: -

   a. Qof da'diisu ka yar tahay 18 sanno

   b. Qofka sharcigu (Maxkamad) ka qaaday awoodda takrifalka

   c. Qofka uu ku caddaaday dembi ciqaabeed la xidhiidha isticmaalka hubka ama fal argagixisnimo.

   d. Qof ay ku caddaatay dhaqan xumo sida, isticmaalka ama ka ganacsiga maandooriyaha, kufsi iwm.

   e. Qof ay ku socoto eedayn inuu galay xadgudub ciqaabeed, inta ay socoto eedayntiisu.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA ◆ FAAFINTA RASMIGA AH ◆ OFFICIAL GAZETTE

2. Cidda ruqsadda Hubka Fudud bixinaysaa waa inay kaalmaysataa wax kast oo muujinaya in cidda ruqsadda la siinayaa aanay ku sifoobin arrimaha ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan sida, marag, caddaymo iwm, si llooga taxadirro in ruqsadda la siiyo cid aan ku habboonayn.

### Qodobka 16aad

### Noocyada Hubka Fudud ee Ka Mamnuuca Dadweynaha

1. Qofna looma ogola inuu u isticmaalo difaaca naftiisa iyo hantidiisaba hubka uu ka midka yahay: -
    a. Dhamaan walxaha qarxa sida: Bamamka, Miinooyinka, Qumuqyada iwm
    b. Dhamaan wixii kimiko ah (Dareere, Budo, Adke ama Gaas) ee loo adeegsan karo qarax ama fal wax lagu dilo.
    c. Dhammaan hubka uu adeegsigooda reebay xeerka xakamaynta hubka iyo rasaasta dagaalka (Xeer. Lr.70/95)
2. Hubka ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan xarafkiisa (A) ee xeerkan lama ogola haysashadiisa, kaydiintiisa iyo isticmaalkiisa midna, qof kasta oo lagu qobtona waxaa laga qaadaya talaabo sharci oo waafaqsan xeerka ciqaabta guud.

### Qodobka 17aad

### Isticmaalka Qalabka Qarxa Aamusiya (Silencer)

Waxaa reebban in loo isticmaalo Hubka Fudud ee ruqsadda loo haysto qalabka qarxa aamusiyaha ee loo yaqaano (Silencerka), lamana diiwaan-gelin karo.

### Qodobka 18aad

### Qiyaasta Hubka Difaaca loo Ogolyahay Ruqsadda

1. Tirada Hubka Fudud ee loo ogol yahay qofka rayidka ah in ruqsad loo siiyo loona diiwaangeliyo waa hal (1) ka mid ah noocyadiisa Hubka Fudud sida: AK ama Baastoolad ee difaaca naftiisa iyo hantidiisa iyo rasaastooda oo aan ka badnayn mid (1) khasnad keliya.
2. Qofka rayidka ee ganacsadaha ah ee u baahan hub ka badan inta ku xaddidan farqadda 1aad ee qodobkan ee difaaca hantidiisa waa in loo diiwaangeliyaa ruqsaddana loo siiyaa, ka dib marka ay Wasaaraddu hubiso tirade hubka uu u baahan yahay.
3. Qofka haysta tiro hub fudud ah oo ka badan inta ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waa inuu ku wareejiyaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana la siinaya magdhow u dhigma qiimaha hubka.

### Qodobka 19aad

### Ilaalinta Nabadgelyada Shirkadaha Iyo Warshadaha Wax soo-saarka i.w.m

1. Waxa la abuurayaa shirkado gaar ah oo nabadgelyo (Private Security Companies) oo leh Xeer u gaar ah, oo iyaga iyo hubkooda iyo ciidankoodaba lagu dhaqo laguna diiwaangeliyo.
2. Shirkadaha waaweyn, Warshadaha wax soo saarka iyo Hay'adaha aan dawliga ahayn ee waddaniga ah, waxaa amniga hantidooda iyo shaqaalahoodaba ka mas'uul ah ciidamadda nabadgelyadda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Haddii Shirkaddaha, wershedaha iyo Hay'adaha ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan ay u baahdaan ilaalo gaara waxay ka qaadanayaan ciidan ilaaliya shirkaddaha gaarka ah ee nabadgelyada marka ay oggolaansho ka helaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

### Qodobka 20aad

### Ruqsadda Hubka ee Madaxda iyo Mas'uuliyiinta Dawladda

Mas'uuliyiinta sare ee Dawladda oo aanay ku jirin madaxda sare ee ciidamadu, haddii ay u bahdaan Hubka Fudud ee difaaca naftooda ee ay Dawladdu leedahay, waxaa ogolaansho u siinaysa Wasaaaradda Arrimaha Gudaha ama wakiilada Wasaaradda ee gobolada ay dagan yihiin.

## CUTUBKA SADDEXAAD

## LA WAREEGIDDA HUBKA FUDUD, QAYBIHIISA IYO RASAASTA

### Qodobka 21aad

### Hubka iyo Rasaasta sharci-darrada ah ee la qabto

Dhamaan Hubka, qaybahaa hubka (Xubnaha) iyo rasaasta aan ruqsadda loo haysan ee la qabto waa hanta dawladeed, qofkii lagu qabtana waxaa laga qaadayaa tallaabo sharci oo waafaqsan Xeerkan Ciqaabta Guud ka dib marka ogolaansho laga helo Maxkamadda awoodda u leh.

### Qodobka 22aad

### La wareegidda Hubka Fudud iyo Rasaastooda Arrimo Nabadgelyada Guud awgood

Haddii ay timaado baahi la xidhiidha duruufo nabadgelyo awgood, dawladdu waxay awood u leedahay inay si ku meel gaadh ah ula wareegto dhammaan Hubka Fudud iyo rasaasta la diiwaangeliyey ruqsadana leh iyadoo u raacaysa sifo sharciga dalka waafaqsan.

### Qodobka 23aad

### Hubka Hantida Dawladeed ah

1. Nooc kasta oo ah hubka waa weyn ee xeerkani tilmaamayo, shacbiga waa ka mamnuuc haysashadiisa iyo isticmaalkiisuba, waxaana loo aqoonsan yahay hanta dawladeed, iyadoo la raacayo qodobka kowaad ee sharciga xakamaynta hubka iyo rasaasta dagaalka Lr.70/95 27/11/95.

2. Xeerkani isagoo tixraacaya qodobka 8aad ee xeerka xakamaynta hubka iyo rasaasta dagaalka Xeer Lr.70/95 ee 27/11/95, xarafkiisa 2aad, iyo 3aad, hubka qarxa ee dagaalka eek u jira gacan ku duwan tan dawladda waa inay ku wareejiyaan Wasaaradda Gaashaandhiga ama Ciidanka Booliska, muddo lix (6) bilood gudahood ah, ka dib dhaqangalka Xeerkan.

## CUTUBKA AFRAAD

## KEENISTA, DHOOFINTA, GANACSIGA IYO GUDBINTA HUBKA FUDUD

### Qodobka 24aad

### Keenista/dhoofinta Hubka Fudud, Qaybihiisa iyo Rasaastiisa

Marka laga reebo Dawladda Somaliland, qofna madhoofin karo, mana keeni karo Hubka Fudud, qaybaha hubka (components), rasaasta iyo qalabka loo adeegsado.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 25aad

### Ganacsiga, Ururinta iyo Dayactirka Hubka Fudud iyo Rasaastiisa

1. Qofna kama ganacsan karo, ma ururin karo, mana dayactiri karo Hubka Fudud
2. Waxaa reebban gadidda iyo gudbinta Hubka Fudud si kasta iyo nooc kasta oo ay tahay ee u gudbaysa qofka caadiga ah (Private Person).
3. Warshadaha Shirkadaha iyo Hay'adaha Dawliga ah ee aan looga maarmayn hawlahooda walxaha qarxa iyo kimikooyinka ku xusan qodobka 15aad ee xeerkan waxay Wasaaraddu samaynaysaa Xeer-nidaamiye gaar ah oo lagu dhaqo isticmaalkooda.

## Qodobka 26aad

### Ciqaab

Wixii dambi ah ee ka dhasha ku xad-gudubka qodobada 23aad iyo 24aad ee xeerkan waxaa loo raacayaa sifo sharci ee waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud Jamhuuriyadda Somaliland.

## CUTUBKA SHANAAD

### Kaydinta iyo Sidashada Hubka Fudud iyo Rasaasta

## Qodobka 27aad

### Kaydinta Hubka Fudud iyo Rasaastiisa

1. Qof kasta oo Ruqsad loo siiyey haysashada hubka fudfudi, waa inuu ka taxadiro meesha uu dhigayo hubkiisa, kana ilaaliyo caruurta iyo cid kasta oo loo ogolayn, kuna kaydiyo qol ama sanduuq u gaar ah oo uu furaha kalidii haysto si aan khasaare lama filaan ahi uga ima.
2. Ciqaabta ka dhalata wixii dayac ama taxaddar darro ah ee ka yimaadda arrimaha ku xusan farqadaha 1aad ee qodobkan waxaa loo raacayaa sifada sharci ee waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud ee JSL.

## Qodobka 28aad

### Sidashada Hubka Fudud

1. Qof kasta oo haysta ogolaanshaha (Ruqsadda) Hubka Fudud, looma oggola inuu si qaawan ugu dhex haysto ama ula dhex maro hubka ruqsadda loo siiyey suuqyada magaalooyinka dhexdooda ama dadweynaha dhexdiisa, waase loo oggol yahay inuu u qaato si asturan.
2. Uma bannaana qofka Hubka Fudud ogolaanshaha (ruqsadda) loo siiyey in uu u adeegsado weerar ama cabsi gelin, ama uu cid kale u ogolaado inay u adeegsato weerar ama cabsi gelin.
3. Qofka ay ku caddaato in uu u adeegsaday Hubka Fudud ee ruqsadda loo siiyey falalka ku xusan farqadda 3aad ee qodobkan waxaa laga qaadayaa tallaabada sharci ee waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud e JSL.
4. Hubka Fudud waxa haysan Kara oo kaliya qofka ogolaanshaha (Ruqsadda) loo siiyey umana bannaana in uu cid kale ergiso u siiyo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 29aad

### Hubka Fudud ee Gaboobay iyo Dhalan-beddelidiisa

1. Haddii Hub fudud oo diwaan-gashan ruqsadna leh uu gaboobo oo uu shaqayn waayo, waa in mulkiilaha hubku la socodsiiyaa xafiiskii marka hore laga diiwaan-geliyey hubka
2. Marka ay cadaato in hubkaasi aaanu lahayn isticmaal dambe waa loo bedalayaa ruqsadda haddii la yimaaddo hub fudud oo kale oo shaqaynaya, hubka gaboobayna wuxuu ku wareejinayaa Wasaaradda iyo Wakiiladeeda si loo burburiyo.
3. Mulkiilaha looma oggola inuu Hubka Fudud ee ruqsadda loo siiyey dhalan-rog ku sameeyo.

## CUTUBKA LIXAAD

## BEDDELAADDA, LA NOQOSHADA, LUMIDDA RUQSADDA HUBKA FUDUD IWM

## Qodobka 30aad

### Lumidda iyo Baddelaadda Ruqsadda Hubka Fudud

1. Cid (qof) kasta oo ay ka lunto ama laga xado Ruqsad loo siiyey haysashada hub fudud, waa in uu sida ugu dhakhsaha badan ugu wargeliyaa Saldhiga Booliska ee ugu dhaw.
2. Qof kasta oo ruqsadda haysashada Hubka Fudud ee ka guura meeshii uu hubku uga diiwaangashanaa, waa in uu muddo bil gudaheed ah kaga diiwaangeliyaa Xafiiska Diiwaangelinta Hubka Fudud ee deegaanka cusub ee uu u guuray.
3. Haddii uu geeriyoodo qof haysta ruqsadda Hubka Fudud, waa in xubnaha qoyska qofka geeriyooday ay ku wargeliyaan Xafiiska diiwaan-gelinta hub fudud 30 maalmood gudahood oo ka bilaamata maalinta dhimashada.
4. Qofka geeriyooday eek u xusan farqadda 3aad ee qodobkan, waxaa ruqsaddiisa haysashada Hubka Fudud loo wareejinayaa qof mas'uul ah oo ka mid ah dadka dhaxalkiisa leh ama cid kale oo qofka dhintay sifo sharci ah ugu asteeyey, haddii ay jirto.
5. Qofka maxkamadi ka qaado awoodda tagrifalka hantidiisa ee lahaa ruqsadda Hubka Fudud oo diiwaangashan, waxaa ruqsada haysashada Hubka Fudud loo wareejinayaa qof mas'uul ah oo ka tirsan dadka dhaxalkiisa leh ama ciddii kale ee maxkamaddu u garato.

## Qodobka 31aad

### La Noqoshada Ruqsadda iyo La wareegidda Hubka Fudud ee Ruqsadda lagala Noqday

1. Diiwaangelinta iyo ruqsadda Hubka Fudud waxaa la tirtiri karaa marka: -

a) Ay caddaato in ruqsadda loo haysto si khilaafsan sifooyinka ku xusan qodobka 14aad ee Xeerkan.

b) Ay dhammaato muddada jiritaanka ruqsaddu ee aan la cusboonaysiin.

c) Uu dhaco ama uu dhamaado sharciga deganaanshaha Rasmiga ah ee JSL oo la siiyey qof ajanabi ah oo leh ruqsadda haysashada Hubka Fudud.

d) Ay caddaato in hubka loo adeegsaday sifaha ku xusan qodobka 11aad, farqaddiisa 4aad ee xeerkan.

e) Go'aanka kala noqoshada waxaa gaadhi kara oo keliya Wasaaradda Arrimaha Gudaha ama Maxkamadda awoodda u leh.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

f) Wasiirka Arrimaha Guduhu, ka dib marka uu helo go'aanka tirtiridda ama kala noqoshada ruqsadda qof hore u haystay, wuxuu soo saarayaa digreeto wasiir oo lagaga qaadayo ruqsada qofkaasi.

g) Qofka ama cidda ruqsadda laga qaaday waa inay hubka ku wareejisaa wasaaradda 24 saacadood gudahood laga bilaabo marka ay soo baxdo digreetada Wasiirku.

## Qodobka 32aad

## Wareejinta Hubka Qofka Muwaadinka ama Ajanabiga ah ee Dalka ka Guura

1. Qofka ajanabiga ah ee haysta ruqsada Hubka Fudud ee difaaca naftiisa iyo hantidiisa ee Dalka ka Guura, wuxuu ku wareejinayaa hubka Ruqsada loo siiyey ee u diiwaan-gashanaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuuna noqonayaa Hanti Dawladeed.
2. Muwaadinka haysta ruqsada Hubka Fudud una guura dalka dibadiisa wuxuu hubkii ku wareejinayaa cid mas'uul ah oo sharcigu u ogol yahay oo ehel-kiisa ka mid ah ama ciddii kale ee mas'uul ah ee uu u garto.
3. Muwaadinka ku xusan farqadda 2aad ee qodobkan, waxaa kale oo u bannaan in hubkiisa uu ruqsadda u haysto ku wareejiyo Wasaaraadda Arrimaha Gudaha, waxaana laga siinayaa magdhaw u dhigma qiimaha hubka, haddii uu sidaa codsado.

## Qodobka 33aad

## Ku Xadgudubka Xeerka

Guud ahaan wixii dambi ah ee ka dhasha ku xad-gudubka xeerkan waxaa loo raacayaa Xeerka Ciqaabta Guud JSL.

## Qodobka 34aad

## Nasakhaad Ama Laalis

Waxaa la laalay ama la nashakhay xeer ama sharci kasta oo ka soo horjeeda Xeerkan.

## Qodobka 35aad

## Xeerka Nidaamiye

Faahfaahinta xeerka xakamaynta Hubka Fudud waxaa xeer-nidaamiya ka soo saaraya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

## Qodobka 36aad

## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka ay Golayaasha Sharci-dejintu ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxeexo.

**Cabdiraxman Maxamed C/lahi (Ciro)**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda JSL**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**

**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOL... OFFICE